Asylum Support Partnership
help and advice

March 2010 Somali

Codsashada Magangalyada

Marka aad magangalyo ka codsatid Boqortooyada Midowday (UK), waxa aad maamulka (Wasaaradda Arrimaha Gudaha - Home Office) weydiisanaysaa inay kuu ictiraafaan qaxooti ahaan. Sharaxaadda qaxooti waxay ka timaada sharci caalami ah oo la yidhaaahdo Xeerka Qaramada Midoobay ee 1951 ee Xaaladda Qaxootiga. Dawladda Boqortooyada Midowday (UK) ayaa go'aan ka gaadhi doonta inay kuu banaan tahay badbaado qaxooti iyo in kale. Si qaxootinimo kuugu banaanaato, waa in dawladda UK ka soo qaado inaad qabto 'cabsi caqli-gal ah oo aad ka qabtid cadaadis' lagugu sameeyo iyada oo sababtu tahay sinjigaaga ama qowmiyadaada, diintaada, ummadaada, ka-tirsanaantaada koox bulsho oo gaar ah ama ra'yigaaga siyaasadeed.

Beddel ahaan, waxa laga yaabaa inay jiraan sababo bini'aadannimo ama kuwo ku kalifaya oo aad daradood u doonaysid inaad joogtid Boqotooyada Midowday, haddii lagu diidona ay taasi jabinayso ama waxyeelaynayso xuquuqdaada bini'aadan ee hoos timaada Xeerka Yurub ee Xuquuqda Bini'aadanka (European Convention on Human Rights). Wakiilkaaga sharciga ama qareenkaaga ayaa awoodi kara inuu kuu sheego haddii taasi adiga ku khuseyso. Xeerarka ama sharciyada xuquuqda bini'aadanku ma aha kuwo sahlan. Waxa muhiim ah inaad heshid la-talin sharci iyo wakiilnimo wacan. Wixii war ah ee ku saabsan la-talinta sharci iyo wakiilnimada, eeg bogga 5 ee qoraalkan yar. Marka aad codsatid magangalyada, waxay dawladdu kugu tilmaami doontaa 'magangalyo-doon'.

Haddii da'daadu ka yar tahay 18, oo aad iskaa u codsanaysid magangalyo, caadi ahaan waxa lagula xidhiidhsiin doonaa adeegyada bulshada (social services) ama hay'ad qaxooti.

Yaa shaqo ku leh codsiyada magangalyada?

Gudaha Boqortooyada Midowday, Hay'adda Xuduudka ee Boqortooyada Midowday (UK Border Agency - UKBA) ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Home Office) ayaa ah waaxda dawladda ee masuulka ka ah wareysiga codsadeyaasha magangalyada iyo qiimeynta codsiyadooda magangalyo.

Sidee baan ku codsadaa magangalyo?

Waxa aad magangalyo ka codsan kartaa

- sarkaalka imigarayshanka ee jooga barta aad wadanka ka soo gashid, tusaale ahaan eerboodhka ama dekadda.
- waxa kale oo aad magangaylo qof ahaan ka codsan kartaa xafiiska Hay'adda Xuduudka ee UK ee kuugu dhow ee ku yaala Croydon ka dib marka aad soo gashid Boqortooyada Midowday. Waxa laga yaabaa inaad, tusaale ahaan, wadanka ku soo gashay sharci-daro ama aad sharci ku soo gashay adiga oo sitay fiisa arday, booqde ama fiisa ganacsi. Unugga Kala-soocidda Magangalyada ee Croydon (Croydon Asylum Screening Unit) waxa uu ku yaalaa **Lunar House, 40 Wellesley Road, Croydon CR9 2BY**.

Asylum Support Partnership is a partnership project hosted by the British Refugee Council
British Refugee Council, (commonly called the Refugee Council) is a company limited by guarantee registered in England and Wales, [No 2727514] and a registered charity, [No 1014576].
Registered office: 240-250 Ferndale Road, London SW9 8BB, United Kingdom

Waxa muhiim ah in marka aad soo gashid Boqortooyada Midowday aad sida ugu dhakhsaha badan u codsatid magangalyada oo aad la-talin sharci u raadsatid sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.

Maxaa dhaca marka aan codsado magangalyo?

UKBA siyaabo kala duwan ayay uga shaqeysaa codsiyada magangalyada. Codsiyada magangalyo qaarkood si dhakhso ah ayaa wax looga qabtaa. UKBA waxay go'aan ka gaadhi doontaa sida wax looga qabanayo codsigaaga ka dib wareysiga ugu horeeya oo la yidhaahdo wareysiga kala-soocidda. Waxa lagu siin doonaa turjubaan haddii aad u baahan tahay. Waxa aad codsan kartaa turjubaan haween ama nin ah haddii aad sidaa jeceshahay.

Haddii aad sheegashadaada magangalyo sameysatay ka dib 5-tii Bishii Saddexaad 2007, fadlan akhri warka hoose – waxay u badan tahay in UKBA wax uga qabato codsigaaga sida lagu sharaxay qoraalkan yar.

Haddii aad sheegashadaada sameysatay ka hor 5-tii Bishii Saddexaad 2007, waxay u badan tahay in codsigaaga si gooni ah uu uga fiirsanayo Maamulka Xalinta Kiiska (Case Resolution Directorate) ee UKBA. Haddii codsigaagu ku jiro noocan waxa aad war dheeraad ah oo ku saabsan sida UKBA wax uga qabanayso codsiyadaas ka heli doontaa qoraalka yar ee lagu magacaabo "Have you applied for asylum before 5th March 2007 and have not been granted the right to stay in the UK?" (Ma codsatay magangalyo ka hor 5-tii Bishii Saddexaad 2007 lagumana siin sharci aad ku joogtid Boqortooyada Midowday?" kaasoo laga helo bartan: http://languages.refugeecouncil.org.uk.

Maxaa ka dhici doona wareysiga kala-soocidda ah?

Ulajeedada wareysigani waxa weeye in UKBA ku weydiiso su'aalo aasaasi ah oo ku saabsan faahfaahintaada shakhsi iyo sida aad ku soo gashay Boqortooyada Midowday. Waa inaanay ku weydiin su'aalo faahfaahsan oo ku saabsan sababta aad u codsanaysid magangalyo.

Faahfaahinta shakhsi iyo dukumentiyada

Inta lagu jiro wareysiga kala-soocidda waxay UKBA kaa qaadi doontaa faraha iyo sawir kuwaasoo lagu dari doonaa Kaadhka Diiwaangalinta Codsiga (Application Registration Card - ARC). Kaadhkani waxa uu xaqiijinayaa inaad tahay magangalyo-doon waxana aad u isticmaali kartaa inaad heshid adeegyada ay ka mid yihiin taageero dhaqaale. Waa in ciddii kugu tiirsan, tusaale ahaan qofka aad is qabtaan ama caruur, ay kuu raacaan wareysigan si faahfaahintooda lagu daro codsigaaga. Marrarka qaarkood, UKBA ma awoodi karto inay ku siiso kaadhka ARC. Taa beddelkeeda, waxa aad heli doontaa Warqad Cadeyn oo Caadi ah (Standard Acknowledgment Letter - SAL) taasoo cadeynaysa sheegashadaada magangalyo.

Badi magangalyo-doonku waxay helaan warqad la yidhaahdo IS96. Taa macnaheedu waxa weeye in si ku-meel-gaadhsiis ah laguu ogalaaday joogitaanka Boqortooyada Midowday inta uu maamulku go'aan ka gaadhayo codsigaaga magangalyo waxana lagaa fili doonaa inaad si joogto ah iskaga xaadirisid xarun isxaadirin ama xarun warbixin inta aad ku jirtid mudadaa. Maamulku waxa uu u hubsan doonaa inaad leedahay dukumenti sharci ah oo ay ku qoran yihiin magacagaaga iyo muwaadinnimadaada, oo aad u isticmaashay inaad ku soo gashid Boqortooyada Midowday. Dukumentigaasi waxa uu noqon karaa baasaboor ama dukumenti aqoonsi oo kale. Haddii aanad haysan dukumenti aqoonsi oo sharci ah, waa inaad sida ugu faahfaahsan ee suurogalka u sharaxdid sababta aanad dukumenti u haysan.

Meesha aad ka timi

Inta lagu jiro wareysiga kala-soocidda waxa uu maamulku go'aan ka gaadhi in wadan kale, oo aan ahayn Boqortooyada Midowday, laga yaabo inuu mas'uul ka yahay inay ka fiirsadaan codsigaaga magangalyo. Tusaale ahaan, waxay taasi dhici kartaa marka aad safarkaagii ku soo martay wadan kale oo ay UKBA u haysato inaad weydiisan karaysay magangalyo.

Codsigaaga si dhakhso ah wax ma looga qaban karaa?
Haddii maamulku go'aan ku gaadho inay codsigaaga si dhakhso ah wax uga qaban karaan waxa markaa codsigaaga la marin doonaa hab go'aameed dhakso ah. Haddii taasi jirto, waxa uu maamulku kuu wareejin karaa Xarunta Saaridda ee Harmondsworth (Harmondsworth Removal Centre) (haddii aad nin tahay) ama Xarunta Saaridda ee Yarl's Wood (Yarl's Wood Removal Centre) (haddii aad haween tahay) ilaa si buuxda go'aan looga gaadhayo kiiskaaga magangalyo. Haddii lagugu xidho mid ka mid ah xarumahaa waa in markaa lagu siiyo wakiil sharci laakiin codsigaaga magangalyo si dhaksho ah ayaa loo go'aamin doonaa. Hase yeeshee, dhamaan codsadeyaasha magangalyo ee kiisaskooda dhakhso la go'aamiyo lama xidho.

Sida ugu dhakhsaha badnayd ee suurogalka ahayd ma u codsatay magangalyo?
UKBA waxay hubin doontaa inaad sida ugu dhakhsaha badnayd ee suurogal kuu ahayd ku codsatay magangalyo ka dib markii aad soo gaadhay Boqortooyada Midowday. Haddii su'aashu tahay 'maya', waxa laga yaabaa inaanad helin gargaar dawladeed oo ah xagga hoyga iyo/ama kharashka nolosha. War dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u codsan kartid taageero magangalyo, ka eeg qoraalka lagu magacaabay 'Codsiga taageero magangalyo ' oo laga helo http://languages.refugeecouncil.org.uk.

Waxa dheeraad ah oo ay u badan tahay in arrimahan soo socdaa ka dhacaan wareysiga kala-soocidda:

- Waa in lagu siiyo magaca iyo teleefonka sarkaal ka shaqeeya UKBA, oo la yidhaahdo kiis haye (case owner), kaasoo mas'uul ka ahaan doona sheegashadaada magangalyo bilawgeeda ilaa dhamaad. Kiis hayuhu waxa uu mas'uul ka yahay inuu ku wareysto oo uu go'aan ka gaadho codsigaaga. Waxa kale oo uu kiis hayuhu wax ka qaban doonaa baahidaada taageero bulsho, oo uu kuu diyaarin doonaa dejintaada haddii go'aan aqbalaad ah lagaa siiyo codsigaaga magangalyo, ama saaristaada, haddii codsigaaga la diido. Kiis hayuhu waa qofka ugu muhiimsan ee ay tahay in aa addiga iyo wakiilkaagu la xidhiidhaan.
- Ku-talogallada lagu helo wakiil sharci waa kuwo kala duwan. Waxa laga yaabaa in lagu siiyo faahfaahinta la-xidhiidhista iyo taariikh aad ku aragtid wakiil sharci ama waxa laga yaabaa in lagu siiyo liis ah wakiilo aad la xidhiidhi kartid.
- Waa in nuqul ama koobi lagaa siiyo qoraalada wareysigaaga kala-soocidda.
- Waa in maamulku kuu sheego inaad isu soo xaadirisid 'qaabilaad' (induction) si laguu siiyo war muhiim ah oo aad u baahan tahay inaad ogaatid oo ku saabsan habka magangalyada iyo nolosha Boqortooyada Midowday.

Waa in maamulku kula socodsiiyo 15 maalmood gudohood adeegyada (tusaale ahaan, taageero dhaqaale iyo hoy) laga yaabo inaad xaq u leedahay. Waxa kale oo laga rabaa inay ku siiyaan war ku saabsan hay'adaha aan dawliga ahayn ee aad talo ugu tagi kartid iyo faahfaahinta hay'adaha kale ee bixiya la-talin sharci.

Maxaa dhici doona wakhtiga wareysiga magangalyada?

Ka dib wareysiga kala-soocidda, waxa uu maamulku ku weydiisan doonaa inaad tagtid wareysi sii dheer si su'aalo lagaaga weydiiyo sababaha aad ku codsanaysid magangalyo. Waxa muhiim ah inaad isku daydid inaad aragtid wakiil sharci ka hor wareysiga. Waa inaad sidoo kale weydiisatid turjubaan kaaga tarjuma wareysiga haddii loo baahdo. Haddii aad rabtid inuu ku wareysto qof ah haween ama rag, taasna waad weydiisan kartaa. Inta aad ku jirtid wareysiga waa inaad intii suurogal ah bixisid faahfaahin badan oo ku saabsan codsigaaga magangalyada. Waa inaad sidoo kale keentid wixii ah marag-kac dheeraad ah, tusaale ahaan diiwaano caafimaad ama warbixinno wargeysyo oo la xidhiidha waxa ka dhacay wadankaaga. Waxa si weyn muhiim u ah in wixii ah war iyo marag-kac ee aad bixisid aanu ahayn mid iska soo horjeeda balse yahay mid taageeraya codsigaaga. Waa inaad ku dartid war ku saabsan qoyskaaga jooga halkan UK ama meel kale adiga oo ku talogalaya wixii saameyn ah ee ku iman kara codsiyo ay mustaqbalka sameeyaan ama aad adigu sameysid.

Waxay u badan tahay inaan wakiilkaaga sharci iman wareysigaaga magangalyo (War dheeraad ah oo ku saabsan la-talinta sharci, ka eeg bogga 5). Haddii wakiil sharci aanuu joogin wareysigaaga,

waxa aad saraakiisha dawladda ka codsan kartaa inay cajalad ku duubaan wareysiga. Waa inaad 24 saacadood ka hor wareysiga u sheegtid haddii aad doonaysid in cajalad lagu duubo wareysiga. Haddii ka dib wareysiga aad u maleynaysid inaad ka tagtay wax war ah oo muhiimad leh, waa inaad sida ugu dhakhsaha badan ugu sheegtid wakiilkaaga sharci. Wakiilkaaga sharci waxa uu haystaa kaliya shan maalmood oo uu ku soo gudbin karo wixii war dheeraad ah.

Xidhid iyo Is-xaadirin

Waxay saraakiisha dawladdu awood u leeyihiin in la xidho qaar ka mid ah magangalyo-doonka heer kasta oo uu marayo codsigooda magangalyo laakiin waa inay muujiyaan in xidhiddu lagama-maarmaan tahay. Badanaa, saraakiisha dawladdu waxay dadka xidhaan haddii ay u maleynayaan inay si dhakhso ah go'aan uga gaadhi karaan codsigooda magangalyo ama haddii ay u maleynayaan in qofku aanuu dib ula soo xidhiidhi doonin. Haddii saraakiisha dawladdu go'aan ku gaadhaan inay ku xidhaan, waa inay qoraal ahaan kuugu sheegaan sababta ay kuu xidhayaan. Waxa laga yaabaa inay suurogal kuu tahay inaad ka doodid go'aankaa. Waa inaad heshid la-talin sharci si la isugu dayo in laga heshiiyo sii-dayntaada. Hay'ad la yidhaahdo Damaanadda Xidhaneyaasha Imigarayshanka (Bail for Immigration Detainees - BID) ama kooxaha booqdeyaasha ee booqda dadka ku jira xadhiga ayaa ku siin kara war ku saabsan sida aad uga hadli kartid sii-dayntaada. Fadlan booqo rugta internetka ee BID oo ku taala: http://www.biduk.org ama ka wac 020 7247 3590.

Badi magangalyo-doonka aan la xidhin waxa laga filayaa inay iska soo xaadiriyaan xarun is-xaadirin. Haddii ay tahay inaad soo safartid wax ka badan saddex mayl si aad isu soo xaadirisid waxa aad codsan kartaa gargaar aad iskaga bixisid kharashka safarka.

Maxaa dhaca inta aan sugayo go'aan?

Waa inaad timaadid dhamaan wareysiyada ay saraakiisha dawladdu ku weydiistaan inaad timaadid. Waa inaad soo buuxisid oo aad soo celisid foomamka ay ku siiyaan gudaha wakhtiga xadka ah. Haddii aad taa ka soo bixi weydo waxa dhici karta in maamulku diido codsigaaga magangalyo sababta oo ah kama aad soo bixin shuruudahooga. Waxa muhiim ah in mudada lagu jiro wakhtigaa aad saraakiisha dawladda la socodsiisid haddii adreeskaagu isbeddelo. Adiga ayaa taa sameyn kara ama wakiilkaaga sharci ayaad weydiisan kartaa inuu kuu sameeyo.

Maxaa dhacaya haddii la diido codsigayga?

Badi codsiyada magangalyo-doonka waa la diidaa inkasta oo codsiyadaas qaar ay goor dambe ku guuleystaan racfaanka. Haddii maamulku diido codsigaaga magangalyo, waxa aad awoodi doontaa inaad racfaan ama ambiil ka qaadatid diidmada, inkasta oo magangalyo-doonka qaarkood ay awoodi doonaan inay racfaan qaataan kaliya ka dib marka ay tagaan Boqortooyada Midowday. Haddii ay jiraan sababo kale oo ku saabsan sababta ay tahay in laguu ogaalado inaad joogtid, tusaale ahaan, haddii lagu saaro waxa dhacaysa in Boqortooyada Midowday ay jabiso xuquuqda bini'aadanka, waa in kuwaa lagu daro racfaankaaga. Waxa muhiim ah in aad la xidhiidhid wakiilkaaga sharci isla markiiba si uu kaaga gargaaro inaad qaadatid racfaan sababta oo ah wakhtiga aad u haystid taa sameynteeda oo aad u kooban.

Haddii racfaankaaga la diido, UKBA ayaa kaa fili doona inaad ka baxdid wadanka. Waxa laga yaabaa in maamulku isku dayo in qasab lagugu saaro haddii aanad si ikhtiyaar ah iskaga tagin.

Sameynta gudbinno dheeraad ah

Haddii racfaankaaga la diido, oo aanad lahayn xuquuq racfaan oo kale, waxa aad go'aan ku gaadhi kartaa inaad bixisid sababo cusub ama dheeraad ah oo ku saabsan sababta ay tahay in laguu oggalaado inaad sii joogtid UK. Waxa tan loo yaqaanaa 'sameynta gudbin dheeraad ah (making a further submission). Waxa muhiim ah inaad raadsatid la-talin sharci oo tan ku saabsan. Gudbinno dheeraad ah waxa aad sameyn kartaa kaliya qof ahaan ama adiga oo gacanta ka dhiiba.

Haddii aad codsatay magangalyo ka hor 5-tii Bishii Saddexaad 2007 oo aad rabtid inaad sameysid gudbinno dheeraad ah waxa aad taas qof ahaan ka sameyn kartaa Liverpool Further Submissions Unit (FSU). Waxa aad ballan dhigan kartaa adiga oo wacaya 0151 237 0980. Haddii aad timaadid FSU ballan la'aan waa lagu soo celin doonaa. Haddii aad u baahan tahay turjubaan waa inaad taas u sheegtid marka aad sameysanaysid ballanta.

Haddii aad codsatay magangalyo maalintii ama ka dib 5-tii Bishii Saddexaad 2007 waxa lagaa rabaa inaad gudbinnada dheeraadka ah sameysid marka is-xaadirinta joogtada ah ay ka jirto aaggaaga.

Qaar ka mid ah mangangalyo-doonka oo ka soo baxaya qodobo dheeraad ah ayaa laga yaabaa inay awoodaan inay gudbinnada dheeraadka ah ku soo diraan boosta halka ay qof ahaan ama gacanta ka keeni lahaayeen. La xidhiidh hay'adda qaxootiga ee kuugu dhow si aad u ogaatid in aad ku jirtid dadkaas iyo in kale.

Habka Magangalyada

Shaxankani waxa uu muujinayaa jidka guud ee uu maro codsi magangalyo. Waxa laga yaabaa in kaagu ka duwan yahay – fadlan weydiiso shaqaale la-talin ama wakiil sharci war dheeraad ah oo ku saabsan kiiskaaga.



La-talin sharci

Waxa aad la-talin sharci ka heli kartaa wakiil sharci. Wakiilada sharci waxa laga yaabaa inay isugu yeedhaan qareenno, looyaro ama la-taliyeyaal sharci (solicitors, lawyers, legal advisers). Haddii aanad haysan lacag kugu filan, waxa laga yaabaa in lagaa bixiyo kharashka la-talinta sharci. Wakiilkaaga sharci waxa uu Dawladda weydiisan karaa inay bixiso fiigiisa iyo kharashyadiisa. Waxa tan loo yaqaana gargaar sharci (legal aid). Waa in wakiiladaada sharci ay soo diyaaraan turjubaan haddii aad u baahan tahay.

Haddii la diiday codsigaaga magangalyo oo aad rabtid inaad qaadatid racfaan, wakiilka sharci wuu diidi karaa inuu galo kiiskaaga haddii uu u maleynayo inaanad lahayn suurogal fiican oo guul lagaga keeno racfaanka. Haddii taasi kugu dhacdo oo aad dareensan tahay inaad haysatid kiis addag, waa inaad ka doodid go'aanka wakiilkaaga sharci adiga oo racfaan u qaadanaya Guddida Adeegyada Sharci (Legal Services Commission). Waa in wakiilkaaga sharci ku siiyo foomka racfaanka iyo war ku saabsan sida loo xereysto. Waxa jira hab sharci oo kale haddii aad joogtid Iskotlaan. Waxa laga yaabaa in Golaha Qaxootiga ee Iskotlaan (Scottish Refugee Council) uu kula talin karo.

Qaybo ka mid ah Boqortooyada Midowday waxa ka jira tiro kooban oo ah wakiilo sharci oo gala hawsha magangalyada. Taa macnaheedu waxa weeye waxa laga yaabaa inaad safartid si aad u aragtid wakiil sharci oo jooga aag kale. Haddii aad qaadatid taageero magangalyo oo wakiil sharci aanu ka jirin aaggaaga, wakiilkaaga sharci ayaa laga yaabaa inuu bixiyo kharashka safarada aad ugu tagtid.

Haddii aad u guurtay aag kale ka dib markii aad codsatay magangalyo waxa laga yaabaa inaad damacdid inaad heshid wakiil sharci oo degmadaada ah sababta oo ah safarka lagu tagayo ballamaha oo noqon kara dhib.

Waxa muhiim ah inaad heshid la-talin sharci oo tayo fiican leh. Waa in wakiilkaaga sharci yahay qareen ama la-taliye ka tirsan hay'ad ama shirkad qandaraas la leh Guddiga Adeegyada Sharciga (LSC) xagga sharciga imigarayshanka ama uu yahay la-taliye ka diiwaansan Xafiiska Guddoomiyaha Adeegyada Imigarayshanka (Office of the Immigration Services Commissioner - OISC).

Hay'adaha ka diiwaansan OISC waxa laga rabaa inay soo dajistaan mid ama labada calaamadood ee halkan lagu muujiyay:

Waa inaad sidoo kale OISC la xidhiidhid si aad u heshid liiska hay'adaha la aqbalsan yahay ee bixiya talo ku saabsan sharciga magangalyada. Teleefon: 0845 000 0046 ama booqo http://www.oisc.gov.uk

La-talin sharci gudaha Iglan iyo Waylis
Adeegga Sharci ee Beesha (Community Legal Advice) ayaa daabaca liiska wakiilada sharci ee Iglan iyo Waylis. Teleefon: 0845 345 4335 ama booqo http://www.communitylegaladvice.org.uk

La-talin sharci gudaha Iskotlaan
Ururka Sharciga ee Iskotlaan (Law Society of Scotland) ayaa daabaca liiska wakiilada sharci ee ka jira Iskotlaan. Teleefon: 0131 226 7411 ama booqo http://www.lawscot.org.uk

La-talin sharci gudaha Waqooyiga Ayrlaand
Guddida Adeegyada Sharci ee Waqooyiga Ayrlaand (Northern Ireland Legal Services Commission) ayaa soo saarta liiska wakiilada sharci ee ka jira Waqooyiga Ayrlaand, booqo http://www.nilsc.org.uk

Siyaabo kale oo lagu helo wakiil sharci

Gargaarka Magangalyo (Asylum Aid) – www.asylumaid.org.uk
Khadka la-talinta: 020 7354 9264 Isniin: 2 – 4.30 galabnimo, Khamiis: 10 subaxnimo – 12.30 galabnimo

Adeegga La-talinta Imigarayshanka (Immigration Advisory Service) – http://www.iasuk.org

Isbahaysga Xirfadleyda Sharciga Imigarayshanka (Immigration Law Practitioners Association) – http://www.ilpa.org.uk

Isu-tagga Xarumaha Sharci (Law Centres Federation) – http://www.lawcentres.org.uk

Cadaaladda Qaxootiga iyo Soo-guuraaga (Refugee and Migrant Justice) – http://www.refugee-legal-centre.org.uk

Ma tahay qof aan ku qanacsanayn wakiilkiisa sharci?

Haddii aanad ku qanacsanayn wakiilkaaga sharci oo aad dareensan tahay in si xun wakiil laguugu noqday, waxa aad cabasho geysan kartaa Xafiiska Guddoomiyaha Adeegyada Imigarayshanka (Office of the Immigration Services Commissioner). Teleefon 0845 000 0046 ama booqo rugtooda internetka oo ku taala barta www.oisc.gov.uk

Warka ku yaala qoralkan yar ma aha sharaxaad buuxda oo ku saabsan sharciga balse waxa uu yahay tilmaan-bixin kaliya. Fadlan raadso la-talin sharci si aad u heshid la-talin faahfaahsan.